




Soo jeedinta qaliinka indhaha (oggaanshaha cilladaha indhaha)

Buug-yeraha macluumaadka



NHS-ta deegaanka waxay soo jeedinaysaa isbeddelo lagu sameeyo halka bukaannada qaarkood ay qorsheeyeen inay ku yeeshaan qalliinka indhaha ee Waqooyiga Bartamaha London (NCL) si aan u sameyn karno qallinada indhaha ee dheeraadka ah ee lagu qiyaasay 3,000 sannadkiiba iyo si loo yareeyo sugitaanada qalliinka badbaadinta aragga ee bukaanada qaarkood ilaa 4 toddobaad.



Waxaan kugula talineynaa inaad isticmaasho qalabka muujinta PDF-ka, wuxuu isticmaalaa midabyo isbarbardhiga sareeya leh oo la kala xulan karo.

Halkee ayay bukaanadu hadda ka heli karaan qaliinada qorshaysan ee indhaha ee NCL?

1. Ururka Royal Free London NHS Foundation Trust ee Isbitaalka Edgware Community, Isbitaalka Royal Free, Isbitaalka Chase Farm, ama Isbitaalka Whittington
2. Isbitaalka Jaamacadda North Middlesex NHS Trust
3. Isbitaalka Moorfields Eye Hospital NHS Foundation Trust ee Moorfields Eye Hospital (City Road Campus) ama Qaybta Indhaha Moorfield ee St Ann's Hospital iyo Qaybta Indhaha ee Moorfields ee Isbitaalka Potters Bar Community Hospital.
4. Adeeg-bixiyeyaa shaahid ah ee qandaraaska lagu siiyey inay bixiyaan adeegyo iyagoo matalaya NHS



Waa maxay sababta isbedelo loo soo jeedinayo?


NHS waxa ay si aad ah uga shaqaynaysay sidii ay wax uga qaban lahayd liisaska sugitaanka ee daryeelka la qorsheeyay, kuwaas oo ka sii daray kadib saamayntii cudurkii safmarenka ahaa ee Covid-19.

Horumar wanaagsan ayaa laga sameeyay NCL waxaana si weyn loo yareeyey tirada dadka muddo dheer sugaya daryeelka.

Inkasta oo ay jiraan dadaalladaas, liiska sugitaanka qalliinka ayaa sii koraya. Tani waxaa sabab u ah tirada dadka u baahan qalliinka ayaa u kordhaya si ka dhakhsa badan tirada habraacyada qalliinka ee aan samayn karno.

Hadba marka ay dadku muddo dheer sugaan, waxaa sii kordhaya

khatarta ay ugu jiraan in caafimaadkooda uu sii xumaado iyo adkaanshaha daryeelka ay u baahan yihiin ayaa sii kordhaya. Tani waxay saamayn ku yeelan kartaa awooddooda shaqo, la xiriirida bulshadooda, daryeelida dadka kale, iyo inay si buuxda u noolaadaan noloshooda.



Waxaan rabnaa inaan sameyno wax kasta oo aan awoodno si aan arrintan wax uga qabano, waxaanan soo saarnay soo jeedinadaan si ay nooga caawiyaa in aan sameyno habraacyo badan oo qalliinka indhaha ah iyo inaan yarayno waqtiyada sugitaanka.

Waa maxay isbeddellada la soo jeediyay?

Laba isbeddel ayaa la soo jeediyay kuwaas oo wanaajin doona waxtarka qallinka isla markaana naga caawin doona inaan fulino habraacyada qallinka indhaha ee dheeraadka ah isla markaana yaraynaya waqtiyada sugitaanka:

1. In la abuuro xarun lagu sameeyo qallinka indhaha (oggaanshaha cilladaha indhaha) ee Isbitaalka Edgware Community Hospital, xaruntaas oo lagu bixin doono qaliinka dadka waaweyn ee cilladaha indhaha ee caadiga ah, badanaa kuwa toosan (aan aad u adkayn). Tani waxay isu keeni doonaa dhammaan qallinada indhaha ee hadda lagu bixiyo Whittington Hospital iyo xoogaa lagu bixiyo Isbitaalada Royal Free Hospital iyo Chase Farm Hospital kuwaas oo la isugu keenayo hal goob oo ku taala Edgware Community Hospital halkaas oo tiro badan oo qalliino ah lagu samayn karo.
2. Tiro yar oo qallinada iyo habraacyada indhaha ee adag kuwaas oo u baahan in lala kaashado takhasusyo kale ayaa ka sii jiri doonaan labada isbitaal ee Chase Farm Hospital iyo Royal Free Hospital.

Bukaanadu waxay sii wadi doonaan inay tagaan isbitaalka ku yaala xaafadooda ama isbitaalka ay door bidaan haddii ay u baahdaan baaritaanada iyo ballamaha bukaan socodka waxayna sii wadan karaan kala xulashada Hay'adda NHS ee loo gudbiyo iyaga si ay u helaan daryeel.

Adeegyada qallinka indhaha ee hadda jira waxay ku sii socon doonaan Isbitaalka Middlesex University Hospital iyo labada goobood ee Moorfields ee NCL (City Road Campus iyo St Ann's Hospital). Adeeg-bixiyeyaasha madaxbanaan ee qandaraaska lagu siiyey inay bixiyaan adeegyo iyagoo matalaya NHS.

Sidee ayay bukaanadu uga faa'iidi doonaan?

Waxaan dib u eegis ku samaynay waraysiyadii laga qaaday bukaanada ee hadda jira si aan u fahanno waxa aadka muhiimka ugu ah bukaanada iyo arrinta caamka ah ee jirta ayaa ah in bukaanadu ay diyaar u yihiin inay safar dheer u galaan haddii si degdeg ah loogu fulin karo arrintooda. Anagoo kordhinayna tirada habraacyada qallinka ee aan sameyn karno, waxaa yeraanaya waqtiga sugitaanka ee bukaanada qaar ilaa afar usbuuc.



Sideen u wadaagi karaa aragtidayda ku saabsan soo jeedinta?

Si aad u wadaagto aragtidaada:

- Buuxi sahan gaaban oo onlayn ah nclhealthandcare.org.uk/eyesurgery (ama nala soo xiriir adiga oo isticmaalaya faahfaahinta hoose haddii aad akhrinayso nugulka daabacan)
- Iimayl u dir nclicb.surgicalhubs@nhs.net
- Warqad u dir **Freepost SURGERY** (looma baahna shaambad ama koodkka boostada)
- Wac **020 4518 7132**
- Ku martiqaad kooxda barnaamijka inay la hadlaan kooxdaada adigoo isticmaalaya faahfaahinta xiriirka ee kor ku qoran.

Fadlan nala soo xiriir haddii aad u baahan tahay macluumaaad u qoran qaab ka duwan qaabkan ama aad u baahan tahay taageero si aad u bixiso aragtidaada, adigoo isticmaalaya faahfaahinta kor ku qoran.

Fursada lagu bixinayo jawaab celinta waxay soconaysaa laga bilaabo 21-ka Agoosto ilaa 16-ka Oktobar 2023.



Halkeen ka heli karaa macluumaaad dheeraad ah?

Macluumaaad dheeraad ah oo ku saabsan soo jeedinta waxaa laga heli karaa websaydka caafimaadka iyo daryeelka NCL

[nclhealthandcare.org.uk/
eyesurgery](http://nclhealthandcare.org.uk/eyesurgery)

Fadlan nala soo xiriir haddii aad wax su'aalo ah qabtid.